

12- iyo 15-jirrada ayaa loo fidinayaa tallaalka koroonaha

Dawladdu waxa ay go'aamisay in 12 ilaa 15 jirka loo fidiyo tallaalka koroonaha, taas oo waafaqsan soo-jeedinta Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Da'aadkan waxa marka hore loo fidinayaa irbadda koowaad ee tallaalka.

– Talooyinka khubarrada ayaa sheegaya in 12-15 jirku ay tallaalka ka helayaan faa'idooyin ka badan dhibaatooyinka uga imanaya. Arrintaas ayaa muhiim u ahayd go'aanka dawladda. Faafidda cudurka ayaa hadda ku badan carruurta iyo dhallinyarada dhexdooda, tallaalka ayaa markaa gacan ka geysanaya in iyaguna helaan maalmo caadi ah, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

– Tallaal badan ayaa hadda la hayaa, markaa degmooyinka qaarkood ayaa si dhakhso ah u bilaabi kara tallaalista 12-15 jirka. Degmooyinku way ku kala duwan yihiin culayska kaga imanaya hawlaха tallaalista, tijaabo-qaadista iyo raadraacista faafidda cudurka. Degmada ayay ku xidhan tahay in ay bilaabi karaan tallaalista da'aadkan oo iyagoo ku barbar wadaya hawlaха kale, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirkha caafimaadka iyo daryeelka.

Tallaalladu waa kuwo la oggol yahay in lagu tallaalo qofka jira 12 sanno ama ka weyn. Waddamo badan, oo ay ka mid yihiin Danmark, Finland, Aysland, Maraykanka iyo Kanada ayaa iyagu hadda tallaalka u fidiya dadka jira da'aadkan.

Kuwa dhashay 2009, waa in degmooyinku u sameeyaan nidaam suurtaggelinaya in kuwa aan weli 12 sanno buuxsamin loo yeedhi karo marka ay 12 sanno gaadhaan.

Waxa la sugayaa in la helo aqoon dheeraad ah

Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa farta ku fiiqay in dhallinyarada jirta 12-15 sanno ay guud ahaan difaac wacan ka helaan tallaalka, waxaanay u badan tahay in jiritaanka difaaca ay ka helayaan irbadda koowaad ka muddo dheer yahay difaaca ay dadka waaweyni ka helayaan. Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa samayn doona qiimayn cusub oo ku

salaysan aqoonta u dambaysa ee ku saabsan dhibaatooyinka waaweyn ee tallaalku keeni karo, sida cudurku isu beddelo iyo sida xaaladda guud tahay ka hor intaan la soo jeedin talo ku saabsan in irbadda labaad la siiyo dadka jira da'dan.

Dadka jira 12-15 sano waxay yihiin ku dhawaad 260 000 qof, ama boqolkiiba 4,8 ayay ka yihiin dadweynaha. Saddex jiil ayaa ka tirsan dugsiga dhexe (2008, 2007 iyo 2006), halka hal jiil ka tirsan yahay dugsiga hoose (2009).

Xaq ayay u leeyihiin in la dhegaysto

Waalidiinta ayaa gaadhaya go'aanka rasmiga ah ee ku saabsan tallaalista carruurtooda.

Carruurta jirta 12-15 sanno sharci ahaan ma gaadhi karaan go'aammada ku saabsan caafimaadkooda, laakiin waa in aragtidooda la dhegaysto marka la qaadanayo go'aammo ku saabsan caafimaadkooda. Tallaalka koroonuhu waxa uu ku xidhan yahay in oggolaansho laga helo qofka ama dadka leh masuuliyadda waalidnimo.

– Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa samayn doono warbixin loogu talogalay 12-15 jirka oo ay xaq u leeyihiin marka la eego heshiiska xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobay, ayuu yidhi Høie.